# Waxa aad u baahan tahay inaad ka ogaato Paxlovid

## Waa maxay Paxlovid?

Paxlovid waa daawo kaa caawinaysa ka hortagga inaad ka bukooto ama ku jirato cudurka COVID-19.

Waxay ka kooban tahay laba daawo (nirmatrelvir iyo ritonavir) daawooyinkaas oo ka wada shaqeeya joojinta in fayraska COVID-19 uu gudaha jirkaaga ku faafo.

Paxlovid ayaa waxaa laga yaabaa inuu ka hortagto calaamadahaaga xanuunka inay ka sii daraan waxana laga yaabaa inuu hoos u dhigo suurtagalka ama fursada ah inaadan u baahan doonin in isbitaal laguu jiifiyo xanuunka COVID-19 darteed.

**Daawada Paxlovid kaama ilaalin doonto inaad mar kale qaado cudurka COVID-19.**

**Daawada Paxlovid ma aha beddelka tallaalka. Difaaca ugu fiican ee looga hortaggo caabuqa halista ah ee COVID-19 ayaa ah inay kuu dhan yihiin tallaalada.**

## Yay tahay inuu qaato daawada Paxlovid?

Waad qaadan kartaa daawada Paxlovid haddii aad halis sare ugu jirto jirro daran oo kaaga timaada xanuunka COVID-19. Waa inaad daawada Paxlovid ku  bilawdaa shan maalmood gudahooda laga bilaabo bilawga calaamadaha xanuunka si ay si fiican daawada u shaqeyso.

Halistaada jirro halis ah inaad ka qaado waxay ku xiran tahay caafimaadkaaga, da'daada iyo xaaladdaada tallaalka.

Daryeel bixiye caafimaad ayaa kuu sheegi kara haddii aad khatar sare ugu jirto iyo haddii kale. Sidoo kale waxaad isticmaali kartaa aalada baaritaanka Ontario si aad u ogaato haddii aad khatar sare ugu irto iyo in kale: **https://covid-19.ontario.ca/covid-treatment-screener**

Waxaa dhici karta inaad halis dheeri ah aad ugu jirto haddii aad tahay:

- ✓ Qof jira 60 ama aad ka weyn tahay;
- ✓ Qof jira 18 ama aad ka weyn tahay  iyo difaacaagu hooseeyo (aad tahay qof habdhiska difaaciisu oo ay daciifisay xaalad caafimaad ama dawooyin);
- ✓ Qof jira 18 ilaa 59 sano jir oo laga yaabo inaadan haysan difaac ku filan oo ka dhan ah COVID-19 (tusaale aah, aad tahay qof aan tallaalnayn, ama ay ka soo wareegtay lix bilood tan iyo markii aad qaadatay qiyaasta tallaalka ama aad la xanuunsatay COVID-19)
- ✓ Qof jira 18 ilaa 59 jir oo qaba mid ama ka badan xaalado caafimaad taasi waxay kugu gelinaysaa halis sare oo ah COVID-19 daran. Qaar ka mid ah xaaladaha caafimaad ee laga yaabo inay ku gelin karaan halis sare ee xanuunka COVID-19 daran ayaa ah:
  - kansar
  - cudurada maskaxda iyo xididada (tusaale ahaan, istarooga)
  - cunuderka kilyaha
  - cudurka beerka
  - cudurka sambabada
  - sambab-galeenka la kala dhaxlo
  - sonkorowga
  - naafanimo
  - xaaladdaha wadnaha
  - caabuqa HIV-ga
  - xaaladdaha caafimaadka ee dhimirka
  - cayil xad-dhaaf
  - uurka iyo uur dhow
  - sigaarka (hadda ama hore)
  - qaaxo/tiibisho

**La hadal daryeel bixiye caafimaad si aad ugala hadasho dalabyada haddii aad u maleyneyso inaad halis sare ugu jirto jirro halis ah oo kaaga timidaada xanuunka COVID-19.**

## Waxaan u maleynayaa inaan qabo xanuunka COVID-19. Sideen ku heli karaa daawada Paxlovid?

Calaamadahaaga halkan ayaad ka hubin kartaa: **covid-19.ontario.ca/exposed#symptoms**

Ontario Health

Haddii aad u maleyneyso inaad halis sare ugu jirto jirro halis ah oo aad isku aragto calaamadaha COVID-19, waxaad:

- ula xiriiri kartaa farmasigaaga (farmashiyaal badan ayaa kuu qori kara daawada Paxlovid)
- ula xiriiri kartaa daryeel bixiyahaaga caafimaadka (dhakhtarka qoyska ama kalkaalisada dhakhtarka)

Sidoo kale waxaad la xiriiri kartaa Health811 haddii aad qabto wax su'aalo ah ama aad u baahan tahay caawimaad. Wac 811 ama booqo **Ontario.ca/health811** si aad ula sheekaysato kalkaalisada qatka internetka.

Waxaa laga yaabaa in Health811 ay kugu xiraan la-talin daryeel oo toos ah haddii ay tan kugu habboon tahay.

**Waa muhiim inaad la hadasho daryeel bixiye caafimaad isla marka aad bilowdo inaad isku aragto calaamadaha.** Daawada Paxlovid waa inaad daawada shan maalmood gudahooda laga bilaabo bilawga calaamadaha xanuunka si ay si fiican daawada u shaqeyso.

Haddii aad isku aragto calaamaddo daran, wac 911 ama tag xarunta xaaladdaha deg-degga ah ee kuugu dhow. Calaamadaha daran waxaa ka mid ah:

- dhibaato dhanka neefsashada ah
- xanuun xabadka/shaka ah
- miyir beel
- wareer/isku dhex-yaac

## Maxay yihiin macluumaadkee aan u baahanahay inaan keeno marka aan kala hadlayo daryeel bixiyahayga caafimaadka ee ku saabsan daawada Paxlovid?

Markaad la hadasho daryeel bixiye caafimaad., waa inaad horey u keentaa:

- liis ku qoran dhammaan daawooyinka aad qaadanayso, oo ay ku jiraan warqadaha dhakhtarku qoray iyo daawooyinka la iska soo gato ee aan dhakhtarka qorin, fiitamiinnada, iyo kaabeyaasha dhirta
- liis ku qoran xaaladahaaga caafimaad ee aad qabto
- nuqdoo baaritaanno dhiig kasta ee dhowaan lagugu sameeyay, haddii aad hayso

U sheeg daryeel bixiyahaaga caafimaadka haddii aad qabto wax xasaasiyad ah, cudur dhinaca beerka ama kelyaha ah, ama haddii aad uur leedahay, aad naas nuujinayso ama aad isticmaasho xakameynta dhalmada hormoonnada (sida kaniiniyada ilaalinta dhalmada ama faashada la isku dhejiyo).

## Ma waxaan u baahanahay inaan iska qaado baaritaanka COVID-19 si aan u helo Paxlovid?

Waxaad u baahan doontaa in lagaa helo xanuunka COVID-19 si aad u qaadato Paxlovid. Baaritaankan wuxuu noqon karaa baaritaanka PCR, shaybaarka degdegga ah, ama tijaabada antigen-ka degdega ah (xitaa haddii guriga lagu sameeyo).

**Uma baahnid in lagaa qaado baaris in lagaa helo ka hor intaadan kala hadlin daryeel bixiye caafimaad ee ku saabsan daawada Paxlovid.** Waxay kaa caawin doonaan inaad hesho baaritaanka haddii aad u baahan tahay.

## Ma bilaash baa daawada Paxlovid?

Daawada Paxlovid waa bilaash oo uu qoro daryeel bixiye caafimaad. Uma baahnid inaad haysato kaarka OHIP si aad u hesho daawada Paxlovid.

## Sideen u qaataa daawada Paxlovid?

Daawada Paxlovid waa la cabaa oo waxaa laga qaataa (afka) laba jeer maalintii shan maalmood.

Daawada Paxlovid waxay ku timaadaa baakad ee loo qaato qiyaas subaxdii ah iyo qiyaas fiidkii ah. Qiyaas kasta waxaa ku jira 2 kiniin oo nirmatrelvir ah (kiniin casaan ah) iyo 1 kiniin oo ritonavir ah (kaniini cad) ah.

Dadka qaba cudurka kelyaha waxaa laga yaabaa in loo qoro qiyaas hooseysa.

Waa inaad qaadataa dhammaan saddexda kiniin ee subaxda isku mar iyo dhammaan saddexda kiniin ee fiidka isku mar, oo aad qaadataa 5ta maalmood oo dhan. Daawada Paxlovid waxaa la la qaadan karaa cunto ama cunto la'aan.

Haddii aad seegto qaadashada qiyaasta daawada Paxlovid oo 8 saacadood gudahood wakhtiga inta badan la qaato, qaado isla marka aad xasuusato. Haddii aad seegto qiyaasta daawada in ka badan 8 saacadood, ka boodi qiyaasta daawada aad seegtay oo qaado qiyaasta xigta wakhtigaaga caadiga ah. Ha qaadan 2 qiyaasood oo ah daawada Paxlovid (6 kiniin) isku mar.

Had iyo jeer u qaado daawada Paxlovid sida saxda ah ee daryeel bixiyeyaasha caafimaadka uu ku faray.

**Weli waad sii faafin kartaa xitaa markaad qaadanayso daawaynta Paxlovid waana inaad raacdaa tillaabooyinka caafimaadka dadweynaha si aad isaga ilaaliso faafitaanka caabuqa.** Tallaabooyinka caafimaadka dadweynaha ee hadda ka akhri halkan: **https://www.ontario.ca/page/public-health-measures-and-advice**

## Waa maxay waxyeelada suurtogalka ee daawada Paxlovid?

Waxaa dhici karta inaad isku aragto waxyeelooyinkan soo socda intaad qaadanayso daawada Paxlovid:

- dhadhanka oo bedelma
- shuban
- dhiig-kar
- murqo xanuun
- calool xanuun
- lalabbo
- dareen guud ee caafimaad darro

Waxaa dhici karta inaad dareento waxyeelo kale. La hadal daryeel bixiyeyaasha caafimaadka haddii aad isku aragto waxyeellooyin ku dhibaya ama aan kaa tagin.

Waxyeellooyinka kale ee dhifka ah laakiin suurtagalka ah ee daawada Paxlovid waa:

- **Falcelino xasaasiyadeed.** Iska jooji qaadashada daawada Paxlovid oo wac daryeel bixiyeyaasha caafimaadka isla markaaba haddii aad isku aragto mid ka mid ah calaamadaha soo socda ee falcelinta xasaasiyadda: baro cuncun oo maqaarkaaga ah (cuncun), liqidda ama neefsashada oo jy dhibta, bushimaha oo barara, wejiga, ama carrabka, cunaha oo adkaada ama xabeeb.
- **Dhibaatooyin dhinaca beerka.** Isla markiiba u sheeg dhakhtarkaaga haddii aad isku aragto mid ka mid ah astaamaha iyo calaamadaha dhibaatooyinka beerka: maqaarka ama indhaha oo hurdi ah (cagaarshow), kaadi aan caadi ahayn oo midab madow ah, xanuun cusub oo dhinaca midig ee calooshaada ah.
- **Iska difaacida daawooyinka HIV.** Haddii aad qabtid infekshanka HIV-ga ee aan la daweyn, daawada Paxlovid wuxuu u horseedi karaa qaar ka mid ah daawooyinka HIV-ga oo aan si fiican ugu shaqeynin mustaqbalka.

## Ma qaadan karaa daawada Paxlovid inta aan qaadanayo dawooyin kale?

Daawada Paxlovid waxa ay la falgali kartaa dawooyin iyo kaabisyo badan oo la isticmaalo. Daryeel bixiye caafimaad (tusaale, farmashiistaha) ayaa laga yaabaa inuu isbedel ku sameeyo daawooyinkaaga kale si aad si badbaado leh u qaadato Paxlovid.

Daawada Paxlovid ayaa sidoo kale saameyn karta sida xakameynta dhalmada hormoonku u shaqeyso. Waa inaad isticmaashaa hab kale oo ka-hortagga uur-qaadidda (tusaale, cinjirrada ama ka-hortagga) markaad qaadanayso daawada Paxlovid.

## Maxaa ila gudboon inaan sameeyo haddii calaamaddahayga xanuunka COVID-19 ay ka sii daraan?

La hadal daryeel bixiyeyaasha caafimaadka haddii aadan ka roonayn ama haddii ay ka sii daraan 5 maalmood ka dib.

Haddii aad isku aragto  calaamaddo aad daran, wac 911 ama tag xarunta xaaladdaha deg-degga ah ee kuugu dhow. Calaamadaha daran waxaa ka mid ah:

- dhibaato dhanka neefsashada ah
- xanuun xabadka/shaka ah
- miyir beel
- wareer/isku dhex-yaac

Macluumaadkan waa sax laga bilaabo bisha Janaayo 2023.

**Ma u baahan tahay macluumaadkan oo qaab kale u qoran?**
1-877-280-8538, TTY 1-800-855-0511, info@ontariohealth.ca

Publication No. 301235 (Somali)
ISBN No. 978-1-4868-6866-7 (PDF)
© King's Printer for Ontario, 2023